



UNIVERSITY OF UTAH  
SCHOOL OF MEDICINE

MUTADAWACIINTA KA QAYB GALAYAASHA CILMI-  
BAARISTA

## XUQUUQDA SHARCIGA ah

Qof kastaa wuxuu leeyahay xuquuq. Cilmi baadhayaasha Jaamacada Utah waxay doonayaan inay ka war hayso xuquuqahaaga.

Adiga iyo kuwa aad jeceshahayba waxaad leediihin xuquuq:

Ay tahay in laguugu sheego sababaha loo sameeyay daraasadda cilmi baadhistan.

Ay tahay in laguugu sheego sida ay uga duwan tahay daryeelkii caadiga ahaa iyo waxa ay iskaga mid ka noqonayaan.

Ay tahay in laguugu sheego khataraha iyo dhibaatooyinka ka dhalan kara, oo ay ku jirto raaxo la'aantu.

Ay tahay in laguu sheego faa'idooyinka aad ka helayso hadaad ka qayb qaadato daraasadda cilmi baadhistan iyo waxay yihiinba.

Ay tahay in laguu sheego dhammaan ikhtiyaaraadka kuu banaan iyo khataraha iyo faa'idooyinkooda.

Ay tahay in laguu sheego daryeelka caafimaad ee aad helayso haddii dhaawac ama caafimaad darro kaaga timaado inta aad ka qayb qaadanayso daraasadda cilmi baadhista.

Inaad waqtii ku qaadato si aad u go'aansato inaad ka qayb qaadato inay sax kuu tahay.

Inaad waqtii ku qaadato inaad su'aalooyin waydiiso, ka hore iyo inta lagu guda jiro daraasadda cilmi baadhista.

Inaad doorato inaanad ka qayb qaadanin daraasadda cilmi baadhista waqtii kasta.

Xuquuqdaada daryeelka caafimaadku isma bedelayso haddii aad go'aansato inaanad ka qayb qaadanin daraasadda cilmi baadhista.

Inaad qaadato go'aankaaga adigoo aan lagu cadaadinayn ama lagu qasbayn.

In nuqul lagaa siiyo foomka heshiiska taariikhaysan ee la saxeexay.



Haddii aad hayso wax su'aalo ah ama tabashooyin ku saabsan xuquuqahaaga, ama xuquuqaha dadka aad jeceshahay, fadlan la soo xidhiidh hagahaaga cilmi baadhista.

Waxaad sidoo kale la soo xidhiidhi kartaa Gudida Qiimaynta jaamacada Utah (Institutional Review Board, IRB) ee nambarkan (801) 581-3655

Ama Looyarka ka Qayb qaadashada Cilmi Baadhista ee (801) 581-3803.

